



Westerville City Schools

Kor Ka Eegidda Brograamka iyo Su'aalaha Badana Leys Wediyo (FAQ) Sannad Dugsiyeedka 2022-2023

Barnaamijka Magnet Dugsiga Degmada Magaalada Westerville (WCSD) waa fursad ka banaan dugsiga hoose uu ardayga iskiisa u doorto, taasoo ardayda darajooyinka 1-5 siiya barnaamijka tababarka, kuwa xiisada gaarka ah iyo rabitaan u qaba manhaj xoogga saara waxbarashada. Barnaamijka Magnet wuxuu ka kooban yahiiin saddax barnaamijyada manhajka kala duwan: Xisaabta/Sayniska, Fanka, iyo Hiddaha Dunida. Barnaamijyada Xisaabta/Sayniska iyo Fanka waxaa guri u ah Hanby halka Hiddaha Dunida ku meeleysan yahay Emerson. Inkastoo barnaamijka Magnet uu u furan yahay ardayga WCSD, waa kooban yahiiin kuraasta la heli karo. Ardayda waxay dalban karaan in ay isku qoraan mid ka mid ah saddexda barnaamij iyaga oo adeegsada habka xulashada aan kala sooca lahayn. Dhamaan saddaxda barnaamij waxay xoojiyaan jawiga iskaashiga waxbarashada lagu qabto dugsiga yar, waxaana ka mid ah tababarka laga bixiyo dhamaan maadooyinka waaweyn ee la midka ah dugsiyadana hoose. Brograamka Hiddaha Dunida ee Emerson wuxuu bixiyaa hal fasal xagga darajooyinka 1-5. Brograamyada Fanka iyo Xisaabta/Sayniska Hanby waxay bixiyaan hal fasal halkii brograam xagga darajooyinka 1-5.

Xullashada Brograamka Dugsiga Manhajka Gaarka (Magnet Program Choices)

Brograamka Xisaabta iyo Sayniska

Barnaamijka Xisaabta/Sayniska wuxuu caruurta siiyaa manhaj ay kala kulmaan kuna sheegaan xisaabta iyo sayniska sida in ay qeyb midaysan ka yahiiin nolol maalmeedka. Barnaamijkan waxaa lagu qabannayaa Dugsiga Hoose Hanby.

Brograamka Fanka

Barnaamijka Fanka wuxuu xoogga saaraa tababarka maadada lala mideyay fanka, sida dhaqaaqa, masrixiyadda, muusikada, fanka aragga, iyo fanka akhriska. Ardayda waxay leeyahiiin fursado ay ku bartaan manhajka degmada lagu xoojiyo tasmada iyo midaynta fanka laga helo dhamaan maadooyinka waxbarashada. Barnaamijkaan waxaa laga helaa Dugsiga Hoose Hanby.

Brograamka Hiddaha Dunida

Barnaamijka Hiddaha Dunida wuxuu hiddaha dunida la mideyaa nuxurka waxbarashada xisaabta, sayniska, fanka luqadda, daraasaadka bulshada, iyo fanka. Barnaamijka wuxuu xoojiyaa garashada iyo koriimada bulshonimada iyo wuxuu horumariyaa fahamka dadka iyo hiddaha kala duwan. Barnaamijkaan waxaa laga helaa Dugsiga Hoose Emerson.

Hababka Arjiga Brograamka Dugsiga Manhajka Gaarka (Magnet Program Application Procedures)

Taariikhda:	Munaasabadda
Abriil 18, 2022	Taariikhda Ugu Dambeysa ee la soo Gudbiyo Arjiga

- Dhammaan codsiyada waa in la buuxiyaa 5 galabnimo Abriil 18, 2022
- Ogeysiinta waxa lagu soo diri doona guriga usbuuca Maajo 2.
- Haddii cunugaada uusan iminka tagin Dugsiga Hoose Magaalada Westerville (Westerville City Elementary School), isaga/iyada waa in ay daggan tahay dagmada Dugsiga Magaalada Westerville (Westerville City School) iyo waa in ay ku qoran tahay sannad dugsiyeedka 2022-2023 ka hor inta aysan arjiga u soo gudbinin brograamka dugsiga manhajka gaarka (magnet school). Fadlan soo booqo bogga internetka www.wcsch.org/enroll in ay bilaabaan nidaamka diiwaan gelinta.
- Waxaa loo baahan yahay in cunug kasta loo buuxiyo arji gaar ah.

Su'aalaha Badanaa Leys Weydiyo ee ku saabsan Brograamka Dugsiga Manhajka Gaarka (Magnet School Program).

Sidee ayaan ku heli karaa macluumaad badan oo ku saabsan Brograamyada Magnet kala duwan?

Dhismo kasta waxaa lagu qaban doonaa Carwada Dugsiga Manhajka Gaarka (Magnet School Fair) iyo Guriga Furan (Open House) marka la gaaro Maarso 16, 2022 waqtiyada soo Socda:

- **Dugsiga Hoose Emerson:** 5:30 p.m. ilaa 6:30 p.m.
- **Dugsiga Hoose Hanby:** 6:00 ilaa 7:00 p.m.

Waxaad kaloo booqan kartaa bogga internetka dugsiga, oo lagala xariiri karo xariirka soo socda: www.wcsoh.org/magnet.

Maxuu yahay jadwalka bakhtiyaa nasiibka Brograamka Manhajka Gaarka (Magnet Program)?

- Maarso 25, 2022 – Taariikhda ugu dambeysa oo lagu buuxiyo arjiyada
- Abriil 8, 2022 – Dhamaan arjiileyaasha waxaa loo diri doonaa warqadaha ogeysiiska iyo emailada loo diro arjiileyaasha
- Abriil 15, 2022 – TAARIIKHDA UGU DAMBEYSO QABASHADA DALABKA

Ma la ogolaan doonaa arjigeeyga marka la gaaro taariikhda ugu dambeysa Maarso 25, 2022 kaddib?

Maya, ma **JIRI DOONTO KA DHAAFID** laga qaato taariikhda ugu dambeysa oo ah Maarso 25, 2022.

Brograamyada Takhasuska Magnet ma waxaa laga bartaa manhaj la mid ah midka laga barto Dugsiyada Magaalada Westerville?

Haa. Brograamyada Magnet Takhasuska waxaa laga bartaa manhaj la mid ah manhajka u dagan degmada/gobolka sida Dugsiyada Magaalada Westerville. Habka Takhasuska Magnet wuxuu la xariiraa mideynta ahamiyadda Takhasuska, kana tirsan manhajka aqoonta gobolka u dagan.

Ma la hormariyaa ku-meeleynta brograamyada magnet walaalaha la dhashay ardayda Brograamyada Magnet?

Maya, ma jirto kala hormarin la xariirto meeleeynta walaalaha.

Marka cunugga loo ogolaado Brograamyada Magnet, ma loo baahan yahay in dib loo dalbado sannad kasta?

Maya, balse bisha Febraayo sannad dugsiiyeed kasta, waalidiinta waxaa loo soo diraa email oo lagu weydiyo haddii ay rabaan in cunugooda uu ku sii jiro Brograamka Manhajka Gaarka (Magnet Program).

Maxay yahiin hababka la raaco haddii cunugga uu ku jiro liiska sugitaanka si uu u helo Brograamyada Magnet?

Boosaska la heli karo waxaa la siin doonaa ardayga ku xiga ee ku jira liiska sugitaanka.

Gaadiid miyaa la siiyaa ardayda tagta Brograamyada Magnet?

Haa. Ardayda waxaa la siin doonaa gaadiidka Baska lagu tago iyo looga soo noqdo Dugsiyada Manhajka Gaarka (Magnet Schools) haddii ardayga uusan dagganeen gudaha masaafo lagu tagi karo dugsiga manhajka gaarka ama haddii uu jiro bas toos u taga. Sida suurtoogalka ah, ardayda waxay raaci doonaa basas lagu baddalo oo lagu tago, loogana soo noqdo Dugsiga Manhajka Gaarka (Magnet School). Dugsiyada Manhajka Gaarka (Magnet Schools) waxay in yar (5-10 daqiiqo) ka dambeyaan dugsiyada kale hoose ee ku yaal Westerville.

Intee ka mid ah Brograamyada Magnet ayaan dalban karaa?

Hal.

Sidee ayaan ku ogaan karaa in arjigayga idin soo gaaray?

Siistemka ayaa jawaabta email ugu diri doono emailka ku qoran arjiga internetka.

Ma jiraa brograamka xanaanada loogu talagalay cunugga cunugga gaaray dugsiga (YWCA Kids Place), ee laga heli karo Dugsiyada Magnet?

Maya, waalidiinta waxay u baahan yahiin in ay qorshaha ka sameyaan brograamyada dugsiga xaafadooda ama Westerville YWCA.

Maxaa dhacaa haddii aan ogolaado qorshaha la soo jeediyay?

Marka ardayga ogolaado qorshaha Brograamka Magnet, dugsiiyaas ayaa ogeysiin doono dugsiga uu ardayga tago, in ardayga uu tagi doono Dugsiga Magnet sannadka waxbarashada xiga. Dugsiga la tago wuxuu diiwaanka ardayga u diri doonaa dugsiga magnet iyo wuxuu ardayga ka saari doonaa liiska.

Cunugeyga ma ku noqon karaa dugsigiisa/dugsigeeda xaafadda kaddib marka uu aqbal qorshaha in uu tago Brograamka Magnet?

Waxaa la filaa in ardayga uu dhamaystiro ugu yaraan hal sanno oo ah Brograamyada Magnet. Codsiiyada ku soo noqoshada waxaa looga shaqeeyaa qof qof. Ma jirto ballan qaad in dugsiga xaafadda uu ogolaan doono arday ku soo noqda haddii uusan boos ka jirin dugsiga xaafadda. Waxaa lagu talliyaa in waalidiinta ka habsadaan dugsiga xaafadda ka hor inta aysan gaarin go'aanada ka noqoshada.

